KADLEC | REGIONAL MEDICAL CENTER

Tilmaamaha Foomka Codsiga Deeqda Daryeelka/Caawimaada Dhaqaalaha

Kani waa codsiga caawimaada dhaqaale (oo sidoo kale looyaqaano Daryeelka Deeqda) ee Kadlec Regional Medical Center (Xarunta Caafimaadka Gobalka e Kadlec).

Sharciga federaalka iyo kan gobalka ayaa kadoonaaya dhamaan isbitaaladu inay siiyaan caawimaad dhaqaale dadka iyo qoysaska buuxsha shuruudo gaar ah oo dhanka dhaqaalaha ah. Waxaad xaq uheli kartaa daryeel bilaash ah ama qiimo jaban ayadoo lagu salaynaayo tirada qoyskaaga iyo dhaqalaaha soo gala qoyskaaga, xataa haddii aad haysato caymis caafimaad. Si aad u aragto xeerkeena caawimaada dhaqaalaha iyo tusmooyinka lacagaha qiimaha jaban ee ladhiibaayo, fadlan booqo webseetka isbitaalkeena oo ah www.kadlec.org kadibna dhagsii qaybta **Pay Bill and Financial Assistance (Bixinta Biilka iyo Caawimaada Dhaqaalaha)**

Maxay daboolaysaa caawimaada dhaqaaluhu? Caawimaada dhaqaalaha caafimaadku waxay daboolaysaa adeegyada kuhaboon ee isbitaalka ee daryeelka caafimaad ahaan muhiimka ah ee isbitaalka ee uu isbitaalkeenu baxsho ayadoo lagu salaynaayo uqalmidaada caawimaada. Caawimaada dhaqaaluhu waxaa laga yaabaa inaysan daboolin dhamaan qarashaadka daryeelka caafimaadka, ayna kujiraan adeegyada ay kusiiyaan ururada kale.

Haddii aad qabto su'aalo ama aad caawimaad uga baahan tahay dhamaystirka codsiga: Xeerarka kusaabsan caawimaadeena dhaqaalaha, macluumaadka kusaabsan barnaamijyada, iyo foomamka codsiga waxaad kahelaysaa webseetkeena ama adoo nasoo waca. Waxaad caawimaad udalban kartaa sabab kasta, ayna kujiraan nafaada iyo caawimaada dhanka luuqada. Dukumiintiyo qoran oo turjumaan oo codsi lagu heli karo.
Waakan qaabka aad noolasoo xariirayso: www.kadlec.org kadibna dhagsii **Pay Bill and Financial Assistance**
Waxaad kawici kartaa Wakiilada Adeegga Macaamiisha: 855-367-1343 ama 509-942-2626

Si codsigaaga looga shaqeeyo, waxaa qasab kugu ah:

- □ **Inaad nookeento kusaabsan qoyskaaga**
  Inaad qorto tirada xubnaha qoyskaaga (qoyska waxaa kamid ah aad dhashay, guurku idin kadhexeeyo, ama caruur aad korsatay oo kula nool)
- □ **Inaad nookeento macluumaad kusaabsan qarashka guud ee soo gala qoyskaaga bishii (qarashaadka kahor inta aan laga jarin canshuuraha iyo lacagaha caymiska) oo ay kujiraan risiidyada mushaarka, foomamka W-2, canshuur celinada, waraaqaha lagugu siiyay caawimaadada social security, iwm.**
  (firii codsiga caawimaada ee kujira Qaybta Dhaqaalaha si aad tusaalayaal dheeri ah uga hesho)
- □ **Inaad noo keento dukumiintiyada cadaynta qoyska soogala aadna qeexdo hantida aad leedahay**
- □ **Inaad soo raaciso macluumaad dheeri ah haddii loobaahdo**
- □ **Inaad saxiixdo aadna taariikhda kuqorto foomka caawimaada dhaqaalaha**

Xasuusnoow: Lagaama doonaayo inaad keento lambarka Social Security si aad ucodsato caawimaad dhaqaale. Haddii aad nookeento lambarkaaga Social Security waxay naga caawinaysaa boobsiinta codsigaaga. Lambarada Social Security waxaa loo adeegsadaa xaqiijinta maclumaadka aad nasiisay. Haddii aadan haysan lambarka Social Security, fadlan kucalaamadee "ima quseeyo" ama "NA."

Boostada ugudir codsiga aad buuxisay iyo dhamaan dukumiintiyada lasocda: Kadlec Regional Medical Center,
Attn: Patient Financial Services, 888 Swift Boulevard, Richland, WA 99352. Xaqiiji inaad nuqul kala harto dukumiintiyada.

Si aad toos ugu gayso codsiga aad buuxisay isbitaalka: Ugee Xafiiska Qasnajiga Isbitaalka ee kuugu dhaw

Waan ku ogaysiin doonaa go'aanka kama danbaysta ah ee aan kagaarno uqalmida iyo xaquuqdaada racfaanka, haddii aad ubaahato, 14 maalin gudahood kadib marka codsiga caawimaada dhaqaale nasoo gaaro, ayna kujiraan dukumiintiyada dhaqaalaha qoyskaaga.

Markaad gudbiso codsiga caawimaada dhaqaalaha, waxaad noo ogolaanaysaa inaan su'aalo kuhaboon kuwaydiino si aan uxaqiijino waajibaadka dhaqaale iyo macluumaadka.

Waxaan doonaynaa inaan kucaawino. Fadlan degdeg usoo gudbi codsigaaga! Waxaa laguusoo diri karaa biilalka ilaa aan kahelno macluumaadkaaga.

KADLEC | REGIONAL MEDICAL CENTER

Tilmaamaha Foomka Codsiga Deeqda Daryeelka/Caawimaada Dhaqaalaha –Waa qarsoodi

Fadlan buuxi dhamaan macluumaadka oo dhamaystiran. Haddii aysan kuqusayn, kuqor godka "NA." Soo gali lifaaqa boggaga dheer ah haddii loo baahdo.

MACLUUMAADKA BAARITAANKA
Ma ubaahan tahay turjumaan? □ **Haa** □ **Maya** *Haddii ay tahay haa, qor luuqada aad doonayso:*
Bukaanku ma codsaday Medicaid? □ **Haa** □ **Maya**
Bukaanku maqaataa adeegyada dawlada gobalka sida TANF, Basic Food, ama WIC? □ **Haa** □ **Maya**
Bukaanku hadda mayahay qof bilaa hooy ah? □ **Haa** □ **Maya**
Baahida daryeelka caafimaad ee bukaanku matahay mid laxariirta shil gaari ama dhaawac shaqada kasoo gaaray? □ **Haa** □ **Maya**

FADLAN XASUUSNOOW

- Ma balan qaadi karno inaad uqalmi doonto caawimaad dhaqaale, xataa haddii aad codsato.
- Marka aad soo gudbiso codsigaaga, waxaan hubin karnaa dhamaan macluumaadka waxaana kaadalban karnaa macluumaad dheeri ah oo cadaynaaya dhaqaalaha kusoo gala.
- 14 maalin gudahood kadib markaan helno codsigaaga oo buuxa iyo dukumiintiyada, waxaan kusoo ogaysiin doonaa haddii aad uqalanto caawimaad.

MACLUUMAADKA BUKAANKA IYO CODSADAHA			
Magaca koobaad ee bukaanka	Magaca dhexe ee bukaanka		Magaca saddexaad ee bukaanka
□ Lab □ Dhadig □ Nooc kale (waad sheegi kartaa _____)	Taariikhda dhalashada		Lambarka Social Security ee bukaanka (qasab maaha*) **qasab maaha, laakiin waxaa loogu baahan yahay si laguu siiyo caawimaad balaaran oo kabadan shuruudaha sharciga gobalka*
Qofka Masuulka Ka ah Biilka	Xariirka kala Dhaxeeya Bukaanka	Taariikhda dhalashada	Lambarka Social Security (qasab maaha*) **qasab maaha, laakiin waxaa loogu baahan yahay si laguu siiyo caawimaad balaaran oo kabadan shuruudaha sharciga gobalka*
Ciwaaanka Boostada _____ _____ Magaalada Gobalka,Lambarka boostada			Lambarka wayn ee xariirka ( ) _____ ( ) _____ Ciwaanka Iimeelka: _____

Xaalada shaqo ee qofka masuulka ka ah bixinta biilka
□ **Lashaqaalaysiiyay** (taariikhda lashaqaalaysiiyay: _____) □ **shaqo la'aan ah** (muddo intee le'eg ayuu shaqo la'aan ahaa:_____)
□ **Isa shaqaalaysiin** □ **Arday** □ **Naafo** □ **Shaqo kafariistay** □ **kuwo kale** (_____

MACLUUMAADKA QOYSKA

Qor xubnaha qoyskaaga, oo aad adiggu kujirto. "Qoyska" waxaa kamid ah dadka aad dhashay, guurku idin kadhexeeyo, ama caruur aad korsatay oo kula nool.

TIRADA QOYSKA _____ *Soo gali lifaaqa bogag dheer ah hadii loo baahdo*

Magaca	Taariikhda Dhalashada	Xariirka kala Dhaxeeya Bukaanka	Haddii uu jiro 18 ama kawayn yahay: Magaca cida aad ushaqayso ama meesha dhaqaaluhu kasoo galo	Haddii uu jiro 18 ama kawayn yahay: Wadarta guud ee dhaqaalaha bishii idin soogala (kahor intiinaan bixin canshuurta):	Sidoo kale macodsanaynaa caawimaad dhaqaale?
					Haa / Maya
					Haa / Maya
					Haa / Maya
					Haa / Maya

Dhamaan dhaqaalaha soo gala xubnaha qoyska ee waawayn waa in lasheegaa. Ilaha dhaqaalaha waxaa kujira, tusaale ahaan:
- Mushaaraadka - Shaqo la'aanta - Ganacsi leh - Magdhawga shaqaalaha - Naafada - SSI - Taageerada Ilmaha/xaaska - Barnaamijyada waxbarashada shaqada) - Lacagta hawlgabka - Qaybaha koontada lacagta hawlgabka - Mid kale (*fadlan sharaxaad kabixi_____)*

KADLEC | REGIONAL MEDICAL CENTER

Foomka Codsiga Deeqda Daryeelka/Caawimaada Dhaqaalaha –Waa qarsoodi

MACLUUMAADKA DHAQAALAHA

Xasuusnoow: *Waxaa qasab ah inaad codsigaaga soo raaciso cadaynta dhaqaalaha kusoo gala.*

Waa inaad bixisaa macluumaad kusaabsan dhaqalaaha soo gala qoyskaaga. Xaqiijinta dhaqaalaha kusoo gala ayaa loobaahan yahay si caawimaad dhaqaale laguu siiyo.

Dhamaan xubnaha qoyska ee jira 18 ama kawayn waxaa qasab ah inay sheegaan dhaqalaaha soogala. Haddii aadan keeni karin dukumiintiyada lagaa rabo, waxaad soo gudbin kartaa bayaan qoran oo saxiixan kaasoo qeexaaya dhaqaaaha kusoo gala. Fadlan keen cadaynta ilkasta oo dhaqaale oo kasoo galo oo aad sheegtay.

Tusaalayaasha cadaynta dhaqalaaha waxaa kamid ah:

- Bayaanka haynta ee foomka "W-2"; ama
- Rasiidyada mushaarka aad hadda qaadato (*3 bilood*); ama
- Cadaynta canshuur celinta sanadkii lasoo dhaafay, ayna kujiraan jadwaladu haddii ay jiraan; ama
- Bayaanka qoran, oo saxiixan oo kasoo baxday cida aad ushaqayso ama qolo kale; ama
- Ogolaanshaha/diidmada uqalmidaada Medicaid iyo/ama caawimaada caafimaad ee gobalku maalgaliyo; ama
- Ogolaanshaha/diidmada uqalmida magdhawga shaqo la'aanta.

Haddii aadan haysan wax cadayn dhaqaale ah ama dhaqaalaba, fadlan kusoo lifaaq bog dheeri ah oo aad sharaxaad kubixinayso.

MACLUUMAADKA QARASHAADKA KUGU BAXA

Waxaan u adeegsanaa macluumaadkaan inaan sawir buuxa kahelno xaaladaada dhaqaale.

Qarashaadka Bilkasta kubaxa Qoyska:

Kirada/daynta gurigga	$_____	Qarashaadka kubaxa caafimaadka	$_____
Qarashaadka Joogtada ah ee Caymiska	$_____	Qiimaha	$_____
Daymaha kale/Kharashaadka	$_____	(*taageerada caruurta, daymaha, daawooyinka, kuwo kale*)	

MACLUUMAADKA HANTIDA MAGUURTADA AH

Macluumaadkaan waxaan u adeegsan karnaa haddii dhaqaalaha kusoo gala kabadan yahay 101% ee Heerarka Udagsan Cabirka Faqriga ee heer Federaal.

Baaqiga hadda kujira koontada jeega $_____ Baaqiga hadda kujira koontada kaydka $_____	Qoyskaagu mahaystaa hantidaan kale ee maguurtada ah? **Tigsaar dhamaan meelaha quseeya** □ Bakhaaro □ Dayn maalgalin ah □ 401K □ Koontooyinka Kaydka Caafimaadka □ Haayad maalgalin (wiqaayad) □ Guri (marka laga reebo guriga aad kunooshahay) □ Ganacsi aad mulkigiisa leedahay

MACLUUMAAD DHEERI AH

Fadlan kusoodar lifaaqa bog dheeri ah haddii ay jiraan macluumaad kale oo kusaabsan xaaladaada dhaqaale ee hadda oo aad doonayso inaan ogaano, sida xaaladaha adag ee dhaqaalaha, qarashaadka xad dhaafka ah ee kaaga baxa caafimaadka, dhaqaalaha xiliga gaarka ah kusoo gala ama kumeelgaarka ah, ama khasaaraha shaqsiga ah ee kugaara.

HESHIISKA BUKAANKA

Waxaan fahmayaa in xarunta Kadlec Regional Medical Center ay xaqiijin karto macluumaadka ayadoo dib u eegaysa macluumaadka daynta macluumaadna kaqaadanaysa ilaha kale si ay gacan uga gaystaan go'aaminta uqalmidaada caawimaad dhaqaale ama caymisyada qarash bixinta.

Waxaan xaqiijinayaa in macluumaadka kor kuqoran uu yahay mid run ah oo saxan ilaa iyo intaan kawarqabo. Waxaan fahmayaa in haddii macluumaadka dhaqaale ee aan bixinaayo la go'aansho inuu been abuur yahay, in natiijadu noqonayso diidmo la iidiido caawimaad dhaqaale, aana masuul kanoqon karo la igana doonaayo inaan dhiibo adeegyada la isiiyo qarashaadkooda.

_____ _____

Saxiixa Qofka Codsanaaya Taariikhda